

SHURO-NET: A poem by Ms Foosiya Axmad Maxamad

1. shuradeenu waa dahab
2. hogaankuna daacad weeyaan
3. danyartey u doodaa
4. xaqdarada u diidaa
5. dawgiyo dustoorkiyo
6. xuquuqdey difaacdaa
7. denbi ruuxa laga galo
8. dulmanay u difaacdaa
9. dibindaabyo kii wada
10. daalinkey isneceb yihiin
11. dar ilaahay oo dhaba
12. danahoodu weeyaan
13. hayeeshee dilaal iyo
14. malaal baa la daba dhigey
15. kii dalowga nagu riday
16. defdef layn haduu wado
17. isagaa ku daaliye dooronayaal
18. wada xaqa dawgu lee yahay
19. weligiin ha daalina dadku weydin
20. jecelyiin denbiilana warkii daa
21. daladana waxaan idhi nin dan
22. gaara doonaa dibjirkii magaalada
23. idiin soo dal badayee xaal doora
24. hooyoo kuli daafacaal bella kaa
25. deyran cadowguna kugu daadsan
44. wuxuu yidhi daneystuhu suldaankii i durayana
45. mid kalaan ku dactal furi
46. wuxuu yidhi daneystuhu haduu dumar idaakhilo
47. ragoodaan ku dirayaa
48. wuxuu yidhi daneystuhu dakhligeyga mooyee
49. danta guudba yeelkeed intaas oo is daba taal
50. hadii aydin diidaan digtaatoribaan ahee
51. idinkaa dantiin og.
52. hayeeshee dadweynii jawaab diiran oo kulul
53. uu ku yidhi daneystaha dar horaa ku daalee
54. aayar didibso oo joog haduu doobigaagii
55. durba buuxsan kuu yahay dihin wey danbeysaa
56. danbarkeeda kii dhamay dacarbuu ka qaadaa
57. waana lagu deyoobaa damaciyo aduunyada
58. maxay dubatey qaar yidhi keligey aan daaq tago
59. dabadeed dugaag cuney indhahaa daboolanoo
60. maqalkaa ka daahane alla yaa u diga tolow.
61. doc kaleeto waxaan idhi dunjiyada dadkeygoow
62. inaan dowlad noqonaan u diyaar garownee
63. waa maxay dabaashani malaa daacad baan jirin
64. ma xuduudahaa dagan ma waxbaan la daba gelin
65. ma damiirkibaa maqan meynagaan daneyneyn
66. meesha daawadeeda ah ma dafbaa la tumayaa

26. ubaxuna waan idiin duceeynee
27. weligiin ha daalina iyagaa deyeysane
28. doc kaleeto waxaan idhi
29. wuxuu yidhi daneystuhu aniguun
30. i daba joog iney dawli weeyee
31. wuxuu yidhi daneystuhu kuwa
32. dalowga lagu riday deymadiinu yey arag
33. hadii kale aan kugu daro wuxuu yidhi
34. daneystuhu digarogashadeydii deg deg
35. siimo weeyaan waa sidii doraad uun
36. wuxuu yidhi daneystuhu dimquraadinimadanu
37. maaha daah icelin kara dibnahana ma dhaafsana
38. wuxuu yidhi daneystuhu distoorkeynu leenahay
39. maaha dabar i xidhi kara anigaa is door biday
40. wuxuu yidhi daneystuhu waxaan ahay damiin
41. adag cidna waan dugsanayaa
42. wuxuu yidhi daneystuhu sida midhaha dareygii ha i deyin
43. dig iga sii inkastuu dirxila yahay
67. iyo daramalkiisii ma dangiigahaa daran iyo heesta
68. debaca leh ma dagaalanbaa jira dabka shidani
69. waa maxay daaha yaa ku hoos jirra aawey
70. danabyadeydii doodbaa ka furan taa.
71. hadal iyo danteydii isku duubni wada jira daw
72. qudha ma qaadnaa. digtu waa ka weyn tahay
73. halka aad dareentee diilimaa dalkeena loo soo
74. dam lee yahay degalkaaga kii gubey dakanadaada
75. kii qabey hadana aan ku deyneyn miyaa dabinka
76. kula raba adiguna damiinyahow deymadaadu waa
77. gaab aragaagu doqonow deyrkaba ma dhaafsana
78. ishu deymo sii dheer dedaal iyo wax qabasho leh
79. kama jiro docdeenane ma waxbaa dahsoonaa
80. docda bari waxbaa jira koofurtaa kasii daran
81. dabka shidani waa door wax la daadsheybaa badan
82. wax la doonayaa jira adiguna ma dagan tahay
83. dunidii ma aragtaa khatarbaa dusheena ah
84. duqeydiyo wax garadkoow intaa door ciyaartaan
85. yaan laba dibleyn iyo danbaabidhadu nala tegin
86. ninaa diir wadaagtaan yaanu kaa dadnimo badin
87. caalamka kuu dareysiinee aayihiina daafaca.